Dib u eegida Adeegyada

Gudida Dadka uu
Caqligoodu
Dhimanyahay
iyo Kuwa leh
Curyaanimo
Xaga Koriinka ah
ee Degaanka Franklin

Aragti

Aragtida Gudida Dadka ay Caqligoodu Dhimantahay iyo Kuwa leh Curyaanimo Xaga Koriinka ah ee Franklin County waa sida soo socota:

Qofka xaqa u leh ee caqligiisu dhiman yahay ama leh curyaanimo xaga koriinka ahi inay ku noolaadaan, ka shaqaystaan, wax ku bartaan bulshada dhexdeeda, inta ay kari karaan, hab amaana oo caafimaad qaba.

Gudida Dadka ay Caqligoodu Dhimantahay iyo Kuwa leh Curyaanimo Xaga Koriinka ah ee Franklin County wuxuu noqon doonaa meel si fiican loo maamulo, leh masuuliyad maaliyadeed, oo degan, hay'ad dadwayne oo bixisa adeeg jaban, adeeg tayo leh oo la shaqeeya qoysaska, iyaga oo isticmaalaya shaqaale xushmad leh oo u go'ay hashooda.

Bulshada Degaanka Franklin waxay xog ogaal u noqon doonaan dadka uu caqligoodu dhiman yahay iyo kuwa curyaamiinta ah, marka lagu sababaha keena iyo siyaabaha looga hortago, waxayna qaadan doonaan qof walba oo ay maskaxdiisu dhiman tahay ama curyaan ah.

FCBMRDD

Dib u eegida Adeegyada

Dib u eegidan adeegyada waxaa dib loo saxay Janaayo, 2004.

Farshaxanka la iticmaalay waxaa bixiyey sawir qaadaha, Martha Perske.

Dib u eegid

Golaha Dadka ay Caqligoodu Dhimantahay iyo Kuwa leh Curyaanimo Xaga Koriinka ah ee Franklin County (FCBMR/DD) wuxuu u shaqeeyaa hay'ad degaan ahaan kaasoo bixiya adeegyo toosa iyo kuwo qandaraasa si joogto ah adeegyadaa oo la siiyo muwaadiniinta degan Degaanka Franklin kuwaa soo ah kuwa caqligoodu dhiman yahay ama leh curyaanimo xaga koriinka ah. Buugan yari wuxuu bixinayaa war asaasiya oo ku saabsan adeegyadan iyo waxyaabaha loo baahan yahay si xaq loogu yeesho. Wixii war ah ee intaa dheer soo wac 475-6440.

Taariikh

Ka hor 1950, caruurta iyo dadka waaweyn ee Caqligoodu Dhimantahay iyo Kuwa leh Curyaanimo Xaga Koriinka ah waxay la haayeen fursad yar inay wax bartaan ama loo tababaro shaqooyin. Nidaamka iskuulada dawlada iyo ganacsiga waa laga reebi jiray. Horaantii 1950 kii, anaga oo la jirna badalaada noloasha dadka, ayaa koox muwaadiniin ah oo lagu magacaabo Golaha Caruurta ay Caqligoodu Dhiman yahay ee Degaanka Franklin ayaa waxa sameeyey dhowr waalid oo leh caruur uu caqligoodu dhiman yahay. Taasi waxay ahayd rajadii ugu horaysay ee in badani inay inay dibada ka ahaadaan hay'adaha oo ay weli helaan adeegyada.

Goluhu wuxuu abuuray "Barnaamijka Dadka uu Caqligoodu Dhiman yahay ee Degaanka Franklin"iyaga oo sameeyey Iskuul iyo barnaamijyo dadka waawayn. Barnaamijka waxaa lagu maalgaliyey deeqo, lacagta waxbarashada, iyo waxoogaa lacag dawladeed. Marka laga soo bilaabo isbadaladii bulshada ee 1960kii, lacag badan oo dawladeed ayaa noqotay diyaar. Wakhtigaana, barnaamiku wuxuu noqday qayb ka mid ah Golaha Daryeelka Caruurta ee Degaanka Franklin.

Adeegyada la siiyo Bulshada ee dadka caqligoodu dhiman yahay iyo kuwa leh curyaanimo xaga koriinka ah waxaa la sii adkeeyey markii la ansixiyey qodobka 169 sanadkii 1967. Qodobkani wuxuu abuuray Golaha Dadka ay Caqligoodu Dhimanyahay ee Franklin County. Magacu wuxuu markii danbe isku badalay Golaha Dadka ay Caqligoodu Dhimanyahay iyo Kuwa leh Curyaanimo Xaga Koriinka ah ee Franklin County markii la badalay qodobkii 160 ee Aqalka sare, kaasoo dhaqan galay sanadkii 1980.

Golaha

Goluhu wuxuu ka kooban yahay todobo xubnood oo uu soo magacaabo Wakiilka Degaanka Franklin ama Xaakin. Sharcigu wuxuu sheegayaa in ugu yaraan saddex ka mid ah xubnaha goluhu inay noqdaan dad ay qoysaskoodu helaan ama ay xaq u lee yihiin, adeegyada Golaha. Dhamaan xubnaha goluhu waxa ku shaqeeyaan si iskaa wax u qabso ah iyada oo aan wax lacag ah laga siinayn adeega ay qabanayaa.

Maalingelinta

Lacagta lagu shaqeysiiyo barnaamijyada waxaa laga helaa dawlada hoose, ta gobolka iyo ta dhexe.

Maalgelinta dawlada hoose waxaa laga helaa cashuurta dawlada hoose maalingekintana waa dakhliga ugu badan ee aan helno.

Maalgelinta gobolka inta badan waa lacag laga soo celiyo Waaxda Dadka uu Caqligoodu Dhiman yahay iyo Kuwa leh Curyaanimo Xaga Koriinka ah ee Ohio iyo Waaxda waxbarashada ee Ohio.

Maalgelinta dawlada dhexe waxaa laga helaa deeqo kala duwan, Barnaamijka Qadada Dugsiyada ee Qaranka.

Shaqaalaha

Shaqaalaha Gudidu waa dad wakhtigoodu huray aadna u tababaran kuwaa soo matalaya xirfadooyin kala duwan. Shaqaaluhu waa inay haystaan shahaado ay soo saarto Waaxda Dadka uu Caqligoodu Dhiman yahay iyo Kuwa leh Curyaanimo Xaga Koriinka ah ee Ohio, iyo/ama Waaxda waxbarashada ee Ohio. Shaqaale kastaa waa inuu lahaa daa heer waxbarasho ee looga baahan yahay shaqadiisa ama shaqadeeda.

Shaqada

Shaqada gudida Dadka ay Caqligoodu Dhimantahay iyo Kuwa leh Curyaanimo Xaga Koriinka ah ee Franklin County waa inay bixiyaan barnaamijyo, adeegyo, iyo taageero la siinayo caruurta, dadka waaweyn iyo qoysaska xaqa u leh; si ay dadka leh curyaanimo xaga curyaanimada ahi ay u noolaan karaan, shaqeysan karaan, wax u baran karaan uguna qaybqaataan arimaha bulshada.

Gudidu waxay aaminsantahay in dadka ay maskaxdoodu dhiman tahay am qaba curyaanimo xaga koriinka ahi ay xaq iyo masuuliyadba lee yihiin sida muwaadiniinta kale ee bulshada. Arimahan waxaa ka mid ah xaqa aad u lee dahay in laguu sheego aadna isticmaasho adeegyada diyaarka ku ah bulshada dhexdeeda; xaqa aad u leeedhay inaad qaadato khataraha macquulka ah; xaqa aad u leedahay in lagaa illaaliyo in age isticmaalo, in lagugu xad gudbo ama si xun laguula dhaqmo; xaqa aad u leedahy in si in lagula dhaqmo si sharaf leh iyo ixtiraam, xaqa aad u leedahay inaad ka qayb qaadataan go’aanada saamaynaya noloshooda iyo masuulnimada inay ixtiraamaan xuquuqda dadka kale.

Adeegyada

Adeegyada waxaa la siinayaa dadka oo dhan da'da ay yihiin, Waxbarashada Caruurta, waxbarashada Guriga, Dadka waaweyn, Dadka la hayo, Ilaha dhaqaalaha ee Qoyska, Xidhiidhinta Adeegyada, iyo Adeegyo Gaar ahba waxaa la siiyaa caruurta, dadka waaweyn iyo qoysaskooda. Inta badan adeegyada waxaa la bixiyaa maalin walba si joogto ah waxaana loo qorsheeyey si loo bixiyo barnaamijyo, adeegyo, iyo taageero la siiyo caruurta xaqa u leh, dadka waaweyn, iyo qoysaskooda; sidaa darteed dadka leh curyaanimo xaga koriinka ah way noolaan karaan, shaqaysan karaan, waxbay baran karaan waxayna ka qabqaadaan karaan bulshada.

Waxbarashada Caruurta

Adeegyada Waxbarashada Caruurta waxaa la siiyaa caruurta ay da'doodu ka yar tahay lix sanno kuwaa soo ay raagto koriinkoodu, curyaanimo ama ay maskaxdoodu dhiman tahay. Shaqaalaha iyo qoysasku waxay si wadajira uga wada shaqeyn doonaan in wakhti hore wax laga qabto ama dugsiga barbaarinta caruurta kaa soo loo kala qaybinayo marka la eego da'da iyo koritaankooda lana siinayo khibrad ku haboon caruurta yar yar. Qorshaha Adeegyada Qoyska ee Gaarka ah (IFSP) ama Qorshayaasha Waxbarashada ee Gaarka ah (IFSP) ayaa loogu talo galay ilma kasta oo ka mid ah qoyska. Fasalo ayaa lagu qaataa subaxii ama galabtii meel kasta laga bilaabo hal ilaa shan beri todobaad walba. Adeegyo la gaynayo guryaha ayaa iyana la bixiyaa si loogu xoojiyo khibrada fasalka. Fursadaha waxbarashada waxaa loo qaabeeyey inuu sare u qaado maskaxda caruurta, in la balaadhiyo istratijiyadaha lagu xaliyo dhibaatooyinka, tartanka ama taxadiga, xirfadaha mashiinada, in la balaadhiyo khibradaha bulshada, balaarinta wada hadalka iyo ciyaaraha xirfadaysan, in la kordhiyo madaxbanaanida qofka, iyo in la isku kalsoonida qofka. fasaladu waxay fursad lagu kala doran karo fasalo gooni gooni ah ilaa qaar laysku darayo, halka caruurta yar yare e leh baahida gaarka ahi ay wax la baranayaan caruur da'dooda oo kale ah oo u koraya si dooda oo kale.

Adeega Guryaha

Adeega Guryahu waxaa la siiyaa caruurta ay da'doodu u dhaxayso marka ya dhashaan ilaa lix jir. Adeegyadani waxay u noqonayaan dhagax dhig caruurta hesha adeegyada waxbarashada waxaana loo siinayaa si loogu badalo ama in lagu kabo adeegyada fasalada. Adeegyada Guryaha ama ama khubaro ku takhasustay Faragelinta Wakhtiyada hore ay booqdaan guryaha si joogto ah iyaga oo baraya waalidiinta farsamooyin gaar ah iyo firfircooni ay samayn karaan si u caawiyaan caruurtooda si ay u noqdaan qaar keligood noolaan kara. Waxa kale oo ay khubarado ka caawiyaan in ay isku duwaan adeegyada aanay bsiiyaan taageero iyo talooyin qoysaska.

Adeegyada Da’da Dugsiyada

Adeegyada la siiyo caruurta gaadhay da’da dugsiga waxaa la siiyaa ardayda leh curyaanimo ka badan mid, marka laga bilaabo da’da shan jir ilaa shan iyo labaatan jir. Goluhu wuxuu bixiyaa adeegyadan iyaga oo la shaqeynaya Dugsiyada Degaanka Franklin, iyada oo la raacayo xeerarka u dejisan Waaxda Waxbarashada ee Ohio. Ujeedada adeegyada dugsigu waa in la baro ardayda xirfado ka caawinaya inay noolaan karaan keligood noqdaana xubno firfircoon oo ka mid ah bulshadooda. Waxaa la barayaa xirfado waxbarasho, wada hadalka, daryeelka nafta, dhexgalka dadka, adeega guriga, tababar xirfadeed iyo wakhtiga aan la shaqaynayn ee la nasanayo iyada oo loo barayo si qof qof ah si loo daboolo baahida ardayda. Waxbarashada waxaa loo qaybiyey afar qaybood oo waaweyn – Arimaha Qoyska, Bulshada, Tababarka Xirfadaha iyo Madadaalada / Nasashada – waxaana xooga la saaray waxbarashada ka dhacaysa bulshada dhexdeeda, taasoo ay ardayda iyo qoysaskoodu ay si joogto ah u isticmaalaan. Dadaal wadashaqayneed oo la galayo degaanada dugsiyada waxaa ka mid ah barnaamijka xagaaga, adeegyada tababarka xirfadaha, wadaaga barnaamijyada horumarinta shaqaalaha iyo adeegyada lagu siiyo ardayda xarumaha degaanada ee caadiga ah.

Adeegyada Dadka Waaweyn

Adeegyada dadka waaweyn waxaa la siiyaa dadka si kor loogu qaado xoriyadooda, isku filaanshahooda iyo waxsoosaarkooda, si loo yareeyo raadadka xaaladaha curyaanimada iyo in dadka laga caawiyo si u helaan nolol tayo fiican leh. Adeegyada waxaa la siiyaa dadka waaweyn da' walba ay yihiin, marka lagu daro dhalinyarada iyo dadka waaweyn.

Warshadaha ARC waa hay'ad aan loogu talogalin in laga faa'iido oo shahaado ka haysata Waaxda Shaqaalaha ee U.S. waxaana awood ay ku shaqayso siiyey Gudida Awood Siinta Xarumaha Dhaqan Celinta (Commision on Accreditation of Rehabilitation Facilities "CARF'). Warshadaha ARC waxay bixiyaan tababar xirfadeed, waxayna taageeraan fursadaha shaqada iyaga oo shaqo siinaya dadka leh curyaanimo xaga koriinka ah. Warshadaha ARC waxay qandaraasyo siisaa warshado kale si ay u siiyaan shaqo macaamiisha ka shaqeeya hoyga farsamada gacanta iyo ganacsiyada kala duduwan ee bulshada dhexdeeda. Dadka waxa kale oo dadka laga caawiyaa inay inay helaan oo ay ka shaqaystaan bulshada dhexdeeda shaqooyin ay xor u yihiin.

Marka lagu daro taageerada tababarka xirfadaha, adeegyo tababar ayaa la bixiyaa si dadka looga caawiyo inay helaan xirfado kor u qaadaya siday keligood ugu noolahaan lahaayeen. Qiimayn, hadal, tababarka socodka, nafsi, daawaynta dabiiciga ah, iyo adeegyo kale ayaa la bixiyaa kuwaasoo ku xidhan baahida gaarka ah ee qofka. Maamulayaasha barnaamijka ayaa la shaqaynaya qof walba iyo qoyskiisa/ma'suulkiisa si ay u qorsheeyaan una fuliyaan barnaamijyada daboolaya baahidan. Adeegyada waxaa kale oo la siiyaa dadka waaweyn ee ay maskaxdoodu dhiman tahay ama leh curyaanimo xaga maskaxda ah. Tababar xirfadeed, fursado bulsheed iyo kowo nasasho ayaa la bixiyaa si joogto ah si kor loogu qaado xor u noolaanshaha ugu saraysa iyada oo la raacayo dariiqada ugu kontoroolka yar si sare loogu qaado koritaanka shakhsiyada iyo isku kalsoonida.

Iskuduwida Adeegyada

Iskuduwida adeega waxaa loo bixiyaa si laysugu xidho dadka iyo taageerada loo baahan yahay si laysugu duwo adeegyada. Isku duwayaasha adeegyadu waxay qiimeeyaan baahida dadka, nidaamiyaan ama u doodaan adeegyada waxaanay dabagalaan shuruudaha adeegyadaa.

Intaa waxa dheer, waaxda isku duwida adeegyadu waxay helaan warbixinta ku saabsan shilalka waaweyn ee aan caadiga ahayn ee ku dhaca dadka uu caqligoodu dhimantahay iyo Kuwa leh curyaanimo xaga koriinka ah. Iskuduwayaasha adeegu waxay ka qaybqaataan baaritaanka waxayna ilaaliyaan dadka si loo yareeyo inay wax shilal kale ahi dhacaan. Waaxda Iskuduwida Adeegyadu waxay lee dahay nidaam tilifoon oo la soo waco afar-iyo labaatanka saac ee maalintii, si loo fududeeyo ka jawaabida xaaladaha dega dega ah.

Taageerada Guryaha

Taageerayaal guryaha ah oo dadka uu caqligoodu dhimanyahay ama Kuwa leh curyaanimo xaga koriinka ah ayuu goluhu heshiis la galaa. Dadka waxaa lagu dhiirigeliyaa inay ka qaybqaataan doorashada halka iyo cida ay la noolaanayaan iyo cida bixinaysa adeegyada taageeradooda. Khiyaarada nolosha waxaa ka mid ah taageero lagu helo guryaha lagu nool yahay, kooxo guryo ku nool, xarumo ay maal geliso Medicaid, guryo. Adeegyada taageeradu waxa laga yaabaa in lagu bixiyo meel walba afar ilaa afar iyo labaatan saac maalin walba, taasoo ku xidhan baahida qofka.

Taageerada Qoyska

Taageero ayaa qoyska la siiyaa si loo caawiyo qoysaska doorto inay haystaan guriga qofka ka mid ka ah ee leh curyaanimo xaga koriinka ah. Adeegyo nasasho ah, ama daryeel guri oo gaaban, ayaa lagu siiya qoysaska guryahooda ama xarun nasasho oo la ogolaaday. Guud ahaan daryeel nasasho ayaa lagu bixiyaa meel walba laga bilaabo afar saac ilaa laba todobaad markiiba. Adeegyada taageerada qoyska waxa kale oo ku jira la talin, tababarka waalidka, iyo caawimo xaga maaliyada ee qalabka curyaamiinta sida gaariga curyaamiinta lagu riixo.

Adeegyada Gaarka ah

Adeegyada gaar ka ah waxaa lagu bixiyaa dhamaan heerarka kala duwan ee barnaamijka waxaana loo qorsheeyey inay daboolaan baahida qofka ha ahaadaan caruur ama dad waaweyne. Dhakhaatiir, kalkaaliyayaal iyo qof cilmi gooni ah ku takhasusay ayaa siiya taageero dadka xaqa u leh, inta badan dadkaasi waxay lee yihiin curyaanimo xaga jirka ah, dareenka ah, dabeecada iyo/ama hadalka ah. Adeegyo madadaalo oo dadka waaweyn ah ayaa la bixiyaa habeen walba oo ah todobaadka dhamaadkiisa, caruur badan iyo dadka waaweyniba waxay ka qayb qaataan Ciyaaraha Olombiyaadka, waxbarashada jir dhiska iyo barnaamijyada biyaha.

Adeegyo gaadiid oo ayaa la bixiyaa kuwaa soo qofka gurigiisa lago soo qaadayo oo la gaynayo xarumaha iyo xafiisyada bulshada laguna celinayo gurigiisa. Basaska badankoodu waxay lee yihiin gaariga curyaamiinta lagu qaado si loogu taageero dadka jir ahaan curyaamiinta ah. Dugsiyada iyo shaqada ka dib waxa kale oo la bixiyaa adeegyo daryeel si loo caawiyo waalidka shaqeeya.

Ayaa Xaq u leh

Adeegyada waxaa la siiyaa caruurta iyo dadka waaweyn da’ walba ha ahaadaane kuwaa soo leh curyaanimo xaga koriinka ah iyo kuwa u qalma heerarka ay dejisay Waaxda Dadka uu Caqligoodu Dhiman yahay iyo Kuwa leh Curyaanimo Xaga Koriinka ah. Adeegyada waxaa la bixiyaa iyada oo aan la eegayn jinsiyada, midabka, lab ama dhedig, diin ama wadanka uu ka soo jeedo.

Qeexitaanka Dadka uu Caqligoodu Dhiman yahay iyo Kuwa leh Curyaanimo Xaga Koriinka ah

Caqli dhinaantu waa ta ugu badan curyaanimada. In ka badan libin laab caruur ah ayaa ku dhasha caqli dhinaanta marka la bar bar dhigo curyaanimada kale ee jirka iyo maskaxda oo lays ku daray. Waxaa lagu qiyaasay Maraykan ka in ka badan todobo milyan uu caqligoodu dhiman yahay sanad walbana waxaa ku soo biiraa 100,000 oo xaaladood oo cusub.

Waxaa lagu qeexaa caqli dhinaanta inay tahay dhaawac gaadha maskaxda oo dhaca wakhtiga koriinka, kaa soo lagu garto maskaxdoodda oo u shaqaynaysa si guud, isla markaana ka gaabinaysa darajada heerka caadiga ee qofku xor ahaan u noolaan karo iyo masuuliyada bulshada ee isaga/iyada la filan karo marka la eego da’da iyo kooxda uu dhaqan ahaan ka soo jeedo.

Caqli dhinaantu maaha caadifad ama dhibaato nafsi ah ama xanuun. Waxaa jira sababo badan oo keena caqli dhinaanta ama curyaanimada xaga koriinka. Waxaa ka mid ah khal khal ku yimaada gubida cuntada (metabolic disorder), Koromosoomo aan caadi ahyn, bukaan ama isticmaalida daroogo/khamri mudada uurka. Dhaawac gaadha maskaxda iyo cudur, ama xanuun yimaada ka ho rama wakhti dhalmada. Badiyaa, dhowr ka mid sababahan ayaa dhaca isla mar keliya, taasoo ka dhigta mid adag in gooni loo saaro sabab keliya xaaladaha ugu badana sababta lama yaqaano. Caqli dhinaantu waxay raadaysaa qoysaska ka yimaada dhamaan qaybaha kala duwan ee bulshada.

Caqli dhinaantu waa mid ka mid ah curyaanimada xaga koriinka. Curyaanimada xaga koriinka waxaa lagu qeexaa curyaanimo daran oo daba dheeraata laguna garto kuwa soo socda :

- Waxaa sabab u ah dhaawac gaadha maskaxda ama jidhka ama labadaba, kaasoon ahayn dhaawac maskaxeed ama jireed oo uu keenay xanuun maskaxeed.
- Waxaa la arkaa inta aanu qofku gaadhin 22 jir
- Waxay u badan tahay inay sii socoto weligeed
- Waxay dhashaa mid ka mid ah kuwa soo scda
    a) marka uu qofku ka yar yahay sadex jir, ugu yaraan hal wax ayey korideedu dib u dhacdaa
    b) marka uu qofku yahay ugu yaraan sadex jir laakiin ka hooseeya lix jir, ugu yaraan laba wax ayey korideedu dib u dhacdaa
    c) Xaalada uu qofku yahy lix jir ama ka wayn yahay, waxaa lagu arkaa xadidnaan aada ugu yaraan sadex ka mid ah kuwa soo socda ee qaybaha nolosha ugu muhiimsan, eek u haboon qofka da’diisa: is hagaajin, hadal celinta iyo dhihida, waxbarashada, socodka, isdirida, awood u lahaanshaha inuu keligii noolaado, iyo, hadii qofku ka wayn yahay 16 jir, inu awood u leeyahay inuu isku filaado dhaqaale ahaan.
- Sababo keena inuu qofku u baahdo talooyin gaara oo kala hooreeya layskuna daray, ama daryeel kale, daaweyn ama adeegyo la bixito wakhti dheer kaaso qofka loo qorsheeyay layskuguna duba riday.

Si go’aan loog gaadho in qofku xaq u lee yahay adeegyada, waxa laga yaabaa in codsado warka qofka, hadii loo baahdo, qiimayn lagu magacaabo Ohio Eligibility Determination nstrument (OEDI) ayaa waxaa sameeya xafiiska waraaqa qabashada. Curyaanimada xaga Koriinku waxa laga yaabaa inay ka dhalato sababo badan, sida caqli dhinaan, cerebral palsy, dhaawac madaxa gaadha, suuxdin ama autsm.

Gudida Dadka uu Caqligoodu Dhimanyahay iyo Kuwa leh Curyaanimo Xaga Koriinka ah ee Degaanka Franklin waxay diyaar u yihiin inay yareeyaan raadadka caqli dhinaanta ama Curyaanimada Xaga Koriinka ah iyada oo loo marayo in wakhti hore la ogaado, barnaamijyo gaar ah oo qof qof ah, iyo tababar la siinayo qof walba da’duu yahyay ba.

Dad soo dirid (Referals)

Si aad dad ugu soo dirto adeegyada, dadku waxay soo wici karaan **Xafiiska Waraaqo Qabashada** ee Gudida Dadka uu Caqligoodu Dhimanyahay iyo Kuwa leh Curyaanimo Xaga Koriinka ah ee Degaanka Franklin telefoonka (614) 464-2743 ext. 390. Iyada oo ay habka qoridu barnaamijyadu uu kala duwan yahay, xafiisk waraaq qabashadu wuxuu bixin karaa tababr talaabo talaabo ah.

Tusmo

Adeegyada Caruurta	Cinwaanka	Telefoon
Early Childhood Center	2879 Johnstown Rd., 43219	475-0564
Early Childhood at Marburn	4141 Rudy Rd., 43214	451-6418
Northeast School	500 N. Hamilton Rd., 43230	476-0530
West Central School	1481 W. Town St.,	276-8231
Adeegyada Dadka Waaweyn		
ARC Industries Central Office	2300 Marilyn Park Ln., 43219	475-7007
ARC Industries East	909 Taylor Station Rd., 43004	864-2406
ARC Industries North	6633 Doubletree Ave., 43229	436-4800
ARC Industries South	4395 Marketing Place, 43125	836-9675
ARC Industries West	250 West Dodridge, 43202	274-5194
Bixby Living Skills Center	4200 Bixyby Rd., 43125	836-6050
Hague Living Skills Center	900 N. Hague Ave., 43204	274-5194
Adeegyada Kale		
Intake Department	350 East Broad St. 43215	464-2743
Service Coordination (24 Saac)	350 East Broad St. 43215	464-2743
Special Olympics/Recreation	2879 Johnstown Rd. 43219	475-6440
Transportation – East Compound	2879 Johnstown Rd. 43219	475-5910
Transp. – South Compound	2201 Advance Ave., 43207	445-9162
Transp., West Compound	250 W. Dodridge, 43205	263-5167
Administration	2879 Johnstown Rd., 43219	475-6440
All Other Departments	2879 Johnstown Rd., 43219	475-6440

Adeegyada Heshiisyada

Marka lagu daro adeggyada uu toos u bixiyo FCBMR/DD, goluhu wuxuu la shaqeeyaa/heshiis la lee yhay in ka badan 100 hay'ado bulshood oo siiya adeeyo taageero iyo tababar caruurta, dadka waaweyn iyo qoysaskooda.

Balanqaad ah Takoorid La'aan

FCBMR/DD dadka kuma kala takoorto marka la siinayo shaqada ama adeeg iyada oo la eegayo jinsiga, midabka, diinta, lab ama dhedig, wadanka uu ka soo jeedo, da'da ama curyaanimo.

Gudida Dadka uu Caqligoodu Dhimanyahay iyo Kuwa leh CuryaanimoXaga Koriinka ah ee Degaanka Franklin

2879 Johnstown Road
Columbus, OH 43219
(614) 475-6440
www.fcbmrdd.org